

Goormaad Wacaysaa 911?

911 waa lambar telifoon oo muhim u ah adiga iyo qoyskaaga oo I rabo inaad ogaatid. 911 waxaad ka diri kartaa telifoon kasta si aad u heshid caawimaad deg deg ah.

Wac 911 makaad rabtid:

- Inaad ka warbixisid meel gubanaysa ama dab qabsaday.
- Inaad dalbatid baabuurka amabalaaska si aad u heshid daaweyn deg deg ah.
- Inaad ka warbixisid dhaq dhaqaaqa shaki ku jiro sida qaylo dheer, xabad qaraxday ama codsi ama qaylo badbaadin raabta.

Marka wacdo 911ka, waxaa laga yaabaa in lagu hakiyo, la yiraah wax yar sug ha dhigin telafoonka; inta uu xiriiriyaha telafoonku kula hadlayo. Haddii aadan ku hadli karin afka ama luqada ingiriisiga, u sheeg xiriiriyaha afka aad ku hadashid ka dibna waa in qof turjumaana telafoonka lagu soo xiraa.

Waxaa muhiim ah inaad xusuusnaatid 911 waxaa loogu talo galay xaaladaha deg dega ah oo kaliya. Haddii aad 911ka u wacdid arin aan deg deg ahayn, waxaa dhici karta inaad qof gargaar deg deg ah u baahan seejisid. Ha wicin 911ka markaad rabtid in lagu sheego jihooyinka ama in qof aad doon doonaysay xabsi ku jiro ama xiran yahay iyo in kale ama aad ka hadashid waxyaalo aan ku lug lahayn xaalad deg deg ah.

Haddii aad rabtid inaad diratid telifoon caadi ah isticmaal lambarada hoos ku qoran (ama eeg buuga telifoonada)

Booliiska San Diego: 619-531-2000
Dabdamiska San Diego: 619-533-4300
Booliiska El Cajon: 619-579-3311
Dabdamiska El Cajon: 619-441-1600
Booliiska La Mesa: 619-667-1400
Dabdamiska La Mesa: 619-667-1355

